

Iskoollada Oslo



Ku waalidka ardayda iskoollada billaabaya iyo kuwa fasallada 1.aad-2.aad ee Ruselokka dugsiga sanad dugsiiyeedka 2021/2022

Oslo, 9.2.2021

WARBIXIN KU SAABSAN BOOS BAR AH OO BILAASH AH EE ISKOOKKA FIRFIRCOONIDA EE FASALKA 1-AAD.- 2.AAD SANAD DUGSIYEEDKA 2021/2022

Dhammaan carruurta billaabaysa fasallada 1.aad iyo 2.aad ee x dugsiga, waxaa boos bar ah oo bilaash ah looga fidinayaa Iskoolka firfircoonida (AKS) sanad dugsiiyeedka 2021/2022. Dee qdu waxay ka billaabansaa ogoosto 2021.

Xeerarka booska barka ah ee bilaashka ah ee AKS

- 12 saac ayaa maalin walba iskoolka kaddib si siman loogu qaybinayaa, taas oo deeqda ka dhigeysa mid si wanaagsan wax loo qorshayn karo oo sare u qaadaysa tayada deeqda
- 2 maalin toddobaadkii inta lagu jiro fasaxyada iskoolka (fasaxa dayrta iyo midka jiilaalka, fasaxa ciidda masiixiga- iyo midka booskaha iyo mid kasta oo ka mid ah toddobaadyada fasaxa xagaaga marka laga reebo bisha luuliyo oo ay AKS xiran tahay)
- maalmaha qorshaynta ee iskoolka/maalmaha fasaxa ah ee u dhexeeya maalmo iskoolku furan yahay ee sanad dugsiiyeedka waxaa la imaanayaa maalin ½ ah (AKS sanadkiiba ilaa iyo labo maalmood ayuu xirnaan karaa maalmaha qorshaynta iskoolka)

Haddii aad doonaysaan in uu ilmuhu ka qaybqaato firfircoonida waxbarashada lagu taageerayo oo dhan, waxaad codsan kartaan boos buuxa oo qiimaha la dhimay.

Boos buuxa oo qiimaha la dhimay

Qiimaha booska buuxa wuxuu ku xiran yahay dakhliga waalidka, wuxuuna noqon doonaa ilaa iyo 1041 karoon bishiiba. Haddii uu ilmuhu boos buuxa haysto wuxuu AKS joogi karaa wakhtiga iskoolka ka hor iyo ka dib ba, iyo maalin walba marka uu iskoolku xiran yahay (marka laga reebo bisha luuliyo).

Ka-qaybqaadashada oo korodha iyo aqoonta luuqadda oo sare loo qaado

AKS waa goob wax lagu barto halkaas oo ciyaar iyo waxbarasho sare loogu qaadayo horummarka maaddo iyo midka bulsho ee ilmaha. AKS wuxuu bixinayaa deeq is-raacsan ayada oo iskoolka lala kaashanayo.

[Manhajka](#) iyo [xeer-hoosaadka AKS](#), iyo [hagaha wadashaqaynta guriga-iskoolka](#) ayaa aasaas u ah deeqda.

Hadafka booska barka ah ee bilaashka ah ee AKS waa in:

- la kordhiyo ka-qaybqaadashada AKS
- sare loo qaado aqoonta luuqadda ee ardayga
- sare loo qaado tayada AKS oo la hubiyo deeq isku mid ah

Sidaan ayaad boos uga codsanaysaa AKS

Waalidku markay ilmaha ku qorayaan AKS waxay isticmaalayaan bogga internetka ee degmada Oslo

www.oslo.kommune.no/skole-og-utdanning/aktivitetsskolen/sok-plass-pa-aktivitetsskolen.

Warbixin intaan ka badan oo ku saabsan iskoollada bixiya booska barka ah ee bilaashka ah ee AKS ka eeg <https://www.oslo.kommune.no/skole-og-utdanning/aktivitetsskolen/gratis-deltids plass/>. Iskoolka la xiriiir haddii aad wax su'aal ah qabto.

Mahadsanidiin

Feltkode endret

Feltkode endret

Feltkode endret

Feltkode endret

Feltkode endret

Iskoollada Oslo

